

KA CAAWI OO JOOJI FAAFIDA COVID-19 RAADRAACA XIRIIRKA

RAADRAACA XIRIIRKA waa hannaan gaar oo qarsoodi ah oo caawinaya in lagu garto dadka laga yaabo inay u bukoonaan sababo la xiriira XIRIIRKA DHOW uu la leeyahay qof kale oo laga helay cudurka 'COVID-19'. Waxay gacan ka geysaneysaa joojinta cudurka inuu fido iyadoo la aqoonsado dadka u baahan inay si amaan ah uga baxaan dadka kale ayna ku xirnaadaan daweynta, haddii loo baahdo.

Haddii lagu aqoonsado inaad tahay xiriir dhow:

1 Waxaa laga yaabaa in lagaa soo woco shaqaalaha caafimaadka dadweynaha.

Waxay ku weydiin doonaan xoogaa su'aalo ah waxayna kugula talinayaan talaabooyinka xiga ee aad qaadi karto. Macluumaadkaaga waxaa loo hayn doonaa si gaar oo sir ah.



2 Waxaad ubaahan kartaa si aad naftaada uga go'do dadka kale.

Tan waxaa ka mid ah ka goynta naftaada illaa 14 maalmood kuwa kale oo isugu jira xubnaha reerkaaga markay suurogal tahay si aad u ilaaliso kuwa kugu dhow.



3 Shaqaale caafimaad dadweynaha wuxuu siin karaa taageero joogta ah.

Way kula soo xiriiri doonaan si ay u ogaadaan haddii aad isku aragto astaamo ama aad ubaahantahay caawimaad.

Macluumaadkaaga waxaa loo hayn doonaa si gaar oo sir ah.



**Ka jawaab wicitaanka oo ka caawi
joojinta fiditaanka.**